Magangeliyo doone: Waxaad shaqayn kartaa oo kaliya, haddii sharciga shaqo-oggolaanshuhu kuu shaqaynayo

Markaad shaqo hesho, hubi in shaqo-oggolaanshuhu kuu bilaabmay oo isla markaana uu shaqaynayo.

Haddii shaqo-oggolaanshuhu kaa dhamaado, waa in aad isla markiiba shaqo bixiyaha u sheegtaa. Shaqo-oggolaansho la'aan, haddii aad ku shaqayso, waxaad noqon kartaa eedaysane dambi.

Goorma ayuu shaqo-oggolaanshuhu bilaabmayaa?

Sida tan ayaad u shaqaysan kartaa oo shaqadda mushahar ama magdhow kale ugu qaadan kartaa:

- Markaad sharciga xaraysato, waxaad shaqada bilaabi kartaa 3 bil kadib, haddii aad maamul-dowladeedka u keento baasaaboor ama waraaqo kale oo socdaal oo la aqoonsan yahay oo shaqaynaya.
- Markaad sharciga xaraysato, waxaad shaqada bilaabi kartaa 6 bil kadib, haddii aad keeni waydo baasaaboor ama waraaqo kale oo socdaal oo la aqoonsan yahay.

Illaa wakhtima ayaad shaqada wadi kartaa?

Markaad go'aanka dalabka magangeliyo-doonkaaga hesho, waa in aad hubisaa in shaqo-oggolaanshuhu weli shaqaynayo.

Haddii aad hesho go'aan oggolaansho degaan ah

- Inta badan Finland waad ka sii dhex shaqaysan kartaa.
- In aad Finland ka dhex shaqayn karto, ka hubi go'aanka ama kaarka sharciga degenaanshaha.

Haddii aad hesho go'aan diidmo degaan ah

- Go'aankaaga waxaa ku qoran macluumaadka ku saabsan, goorta ay xuquuqdaadada shaqo-qabashadu dhammaanayso.

Xuquuqda shaqo-qabashada, haddii Hoggaanka socdaalku uu arrinkaaga ka gaaray go'aan didimo ah laga bilaabo1.9.2024 ama kaddib

Xuquuqdaada shaqo-qabashada waa ay shaqaynaysaa muddada racfaan qaadashada, taasoo loola jeedo 30 maalmood oo laga soo bilaabaayo markii aad hoggaanka socdaalka ka heshay wargelinta go'aanka.

- Haddii aad go'aanka Hoggaanka socdaalka racfaan ka qaadato oo aad u gudbiso Maxkamadda maamulka, Xuquuqdaada shaqo-qabashadu waxaa ay shaqaynaysaa illaa iyo inta aad ka heleyso go'aanka Maxkamadda maamulka.
    - Haddii Maxkamadda maamulku ay soo diiddo racfaankaaaga qaybta badbaadada caalamiga ah. Xuquuqdaada shaqo- qabashadu waxaa ay

dhammaanaysaa laga bilaabo maalinka aad go'aanka ka heshay Maxkamadda maamulka.

- Haddii Maxkamadda maamulku ay busrio go'aankii Hoggaanka socdaalka qaybtiisa badbaadada caalamiga ah, oo ay codsigaaga dib ugu soo celiso Hoggaanka socdaalka, xuquuqdaada shaqo-qabashada waxaa ay shaqaynaysaa illaa iyo inta uu Hoggaanka socdaalku markale ka gaaraayo go'aanka arrinkaaga. Go'aankaaga waxaa ku qoran macluumaadka ku saabsan xuquuqdaada shaqo-qabashada.
- Haddii Maxkamadda maamulku ay diiddo racfaankaaga qaybta badaabada caalamiga ah, laakiin ay sababo kale awgood arrinka dib ugu celiso Hoggaanka socdaalka, xuquuqdaada shaqo-qabashadu waxaa ay dhammaanaysaa laga bilaabo maalinka aad go'aanka ka hesho Maxkamadda maamulka.

Haddii Hoggaanka socdaalku uu codsigaaga magangalyoddoonka ku falanqeeyo nidaamka dedejinta, ama Hoggaanka socdaalku uu codsigaaga ka sameeyay go'aanka joojinta baarista, xuquuqdaada shaqo- qabashadu waxaa ay dhammaanaysaa laga bilaabo maalinka aad go'aanka ka hesho Hoggaanka socdaalka.

Haddii ay xuquuqdaada shaqo-qabshada dhammaatay, mar labaad dib uma bilaabanayso, haddii aad Maxkamadda sare ee maamulka ka codsanayso oggolaanshaha racfaanka.

- Haddii Maxkamadda sare ee maamulka ay arrinkaaga dib ugu soo celiso Hoggaanka socdaalka ama Maxkamadda maamulka, si ay markale dib ugu falanqeeyaan, xuquuqdaada shaqo-qabashada marlabaad ayay bilaabanaysaa.
- Si kastaba xuquuqdaada shaqo-qabashada dib uma bilaabanayso, haddii Hoggaanka socdaalka uu codsigaaga ku falanqeeyay nidaamka dedejinta ama uu codsigaaga ka gaaray go'aanka ah joojinta baaritaanka, islamarkaana maxkamadda sare ee maamulku ay arrinkaaga dib ugu soo celisay Maxkamadda maamulka si ay u falanqayaso. Xuquuqdaada shaqo-qabashada waxaa ay dhammaatay laga soo bilaabo maalinkii aad Hoggaanka socdaalka ka heshay wargelinta go'aanka.

Xuquuqda shaqo-qabashada, haddii Hogaanka socdaalka uu arrinkaaga ka gaaray go'aanka diidmada ah, la ga soo bilaabo 31.8.2024 ama wixii ka horreeyay taariikhdaas

Xuquuqdaada shaqo-qabashada waxaa xaddidaaya ama lagu wadayaa nidaamkii sharcigii hore. Xuquuqdaada shaqo-qabashada waxaa ay dhammaanaysaa, marka go'aankaaga uu yahay mid la fulinaayo ama dhaqangal ah, taasoo loola jeedo inaad tahay qof waddanka laga saari karo. Go'aanka waxaa ku qoran macluumaadka ku saabsan, goorta uu go'aankaagu yahay mid dhaqangal ah, iyo goorta ay xuquuqdaada shaqo-qabashadu dhammaanayso.

Arrimaha ku saabsan shaqo-oggolaanshaha magangeliyo doonaha, ka akhriso bogga internetka ee Xafiiska Imigreeshinka: migri.fi/turvapaikanhakijan-tyonteko-oikeus

Sidee dalabka cusub u saamayn karaa shaqo-oggolaanshaha?

Haddii aad dalab cusub xaraysatay, sida tan ayaad shaqo u bilaabi kartaa:

- Markaad sharciga xaraysato, waxaad shaqada bilaabi kartaa 3 bil kadib, haddii aad maamul-dowladeedka u keento baasaaboor ama waraaqo kale oo socdaal oo la aqoonsan yahay oo shaqaynaya.
- Markaad sharciga xaraysato, waxaad shaqada bilaabi kartaa 6 bil kadib, haddii aad keeni waydo baasaaboor ama waraaqo kale oo socdaal oo la aqoonsan yahay.

Dalabka cusub waa mid magangeliyo lagu doonayo. Waa mid qofka magangeliyo-doonku xaraysto, markaa dalabyadaaddii hore wadadda sharciga maraan oo soo af jarmaan. Waa marka go'aanka sharcigu ku dhaco oo rafcaan-qaadasho dhamaato.

Shaqo bixiyaha waxa ku waajib ah, hubinta shaqo-oggolaanshaha

Shaqo bixiyuhu waa in uu iska hubiyaa in aad leedahay sharciga degenaanta ee shaqaalaha looga baahan yahay ama in aanad sharcigaa degenaansha sidiisaba u baahbayn.

Shaqo bixiyaha waxa lagu eedayn karaa dambi ama ganaax, haddii si oggaan ama dayacaadi ku jirto shaqaalihiisa ugu shaqaysto, isagoon loo oggolayn in uu qofkaasi shaqeeyo.

Sharci ahaan uma baahnid in aad cadayso shaqo-oggolaanta

Markaad magangeliyo doonka tahay xuquuqdaadda shaqadu waxay ku salaysan tahay shaqciga ajaanabiga. Laakiin haddii adiga ama shaqo-bixiyuhu rabtaan in aad heshaan warqadda shaqo-oggolaanta, waxaad waydiisan kartaan Xafiiska Imigreeshinka: migri.fi/todistuspyynnot. Warqaddu waxay sheegaysaa nooca shaqo-oggolaantaadu ahayd, marka warqaddu soo baxday.

Go'aanka Waaxda socdaalka ayaa lagu sheegay, goorta uu go'aanku yahay mid dhaqangalaaya. Booliska ayaa ka mas'uul ah dhaqangelinta go'aanka. Xilhayaha illaalinta ammaanka shaqada ayaa kormeeriya shaqo bixiya, sida uu waajibkiisa illaalin shaqo-oggolaanshahaaga uga soo baxayo: tyosuojelu.fi/tyosuhde/ulkomainen-tyontekija/tyonteko-oikeus. Markaa arrimahan awgood ayaa shaqo bixiyehaagu ula xiriiri karaa xilhayaha arrinkan oo kale khuseeyo.